San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilliga Gu'ga 2004

Laba iyo toban arrimood oo ay Ardeydu sameyn karaan si dugsiga rabshada loo joojiyo

Golaha Ka-hortegga Dembiyada ee Qaranku waxay soo taxeen aragtiyo ay isleeyihiin waxay kaalmo ka geysan karaan in dugsiga rabshada lagaga joojiyo. Qaarkood waxay u baahan yihiin ficil uu shakhsi sameeyo oo keliya; qaarna waxay u baahan yihiin dadaal wadajir ah. Kuwa kalena waxay soo bandhigaan sababaha rabshada dhaliyey. Waxaad tan u qaadataa inay bilow tahay- waxaa jira waxyaabo badan oo la sameyn karo.

Had iyo jeer waa inaad waalidkaa wax ay ku leeyihiin aad maqashaa, awaamiirta nabadgelyada dugsiga ku saabsana u hoggaansanaataa.

1. Dugsiga hub ha u soo qaadanin, qof kale hub u leeyahay dugsiga ha keenin, hana ka aamusin haddaad argatid qof kale oo hub wata.
2. Waa inaad wax kasta oo dembi ku lug leh oo aad aragtid si dakhso ah ugu gudbisaa madaxada dugsiga iyo booliiska.
3. Waa inaad waxyaabaha akhlaaq xumada iyo hadal xumada ah ee ay ardeydu sameynayaan la socodsiisaa macallinka ama la-taliyaha dugsiga.
4. Waa inaad barataa siyaabaha cadhadaada loo qaboojiyo, waxaana ka mid ah adiga oo qofkii kaa cadheysiiyey si wanaagsan ula hadla ama intii aad la dagaalami lahayd meesha uu joogaba iskaga tega.
5. Waa inaad ardeyda kale ka caawisaa siyaabaha khilaafka loo demiyo ama xaliyo. Waxaad kale oo aad bilowdaa inaad ka qeybgeshid barnaamijka ku saabsan sida dadka isku da'da ah loo kala dhexdhexaadiyo, taas oo ay ardeyda tababarka qaadatey ka caawineyaan ardeyda fasalkooda sida khilaafka loo xaliyo, iyadoon gacan-qaad iyo hub midna la isticmaalin.
6. Waxaad dhalinta da'da yar u sameysaan maxkamad ay iyagu isu noqoneyaan garsoore, xeer-ilaaliye, xeer-beegti iyo abukaate. Makamadahaas dhalinyarada waxay qaadeyaan dacwooyinka, kiisaskana wey baadheyaan, kedibna go'aanka ayey qaadaneyaan, kaas oo laga yaabo marka uu demiga qirto in la xukumo oo xabsiga loo diro. Dhalinyaradu waxay door-bidayaan inay maxkamadaas ka hawlgaan, marka loo eego maxkamada dhallinyarada ee nidaamkeeda sharci ay gacanta ku hayaan dadka waaweyn.
7. Waxaad la-taliye u noqotaa ilmaha aad isku da'da tihiin, isla mara ahaantaasna, waxaad ardeyda aad isku fasalka tihiin ka caawisaa siyaabaha dhibaatooyinka loo xaliyo.
8. Waxaad la-taliye u noqotaa ardeyda kaa da' yar. Waxaad saaxiib ama mid lagu deydo oo wanaagsan u noqon kartaa ardey kaa da' yar, taas oo aad ardeydaas inuu dugsiga la qabsado wixii caawimaad ah ee uu rabana ku weydisto u sahleysaa.
9. Waxaad sameysaa kooxda dembiyada dugsiga ka dhacaya ilaalisa. Waxaad kooxdaas ku dartaa qaar ka mid ah areyda kormeereysa wadiiqooyinka dhisme ku dhex yaal, meelaha bannaan ee baabuurta la dhigto iyo inay ardeydu warbixino soo gudbiyaan iyagoo magacooda sheegin.
10. Waxaad dhacdo kasta ama naadi kasta muhiim uga dhigtaa inay yihiin meelo ka xaaraansan rabshadaha. Wargeysayadu waa inay soo daabacaan siyaabaha rabshadaha looga hor-tego. Naadiga farshaxanku waa inuu muujiyaa dhibaatooyinka ay rabshaduhu leeyihiin. Naadiyada shaqooyinkuna waa inay soo bandhigaan siyaabaha ay rabashadu saameyn ugu leeyihiin shaqooyinka ay ardeydu mustaqbalka higsaneyaan. Kooxaha ciyaaruhu waxay soo bandhigi karaan siyaabaha loo yareneyo rabashadaha, kuwaas oo aan qorshaha ciyaaraha ku jirin.
11. Waa inaad ardeyda cusub ee dugsiga ku soo biirta soo dhaweysaa, oo aad ardeyda kale bartaa. Waxaad isku deydaa toddobaad kasta inaad baratid hal ardey oo aadan horey u aqoonin.
12. Waa inaad bilowda (saxiixdaa) ololaha "ballan-qaadka nabadgelyada", kaas oo ay ardeydu ku ballan-qaadeyaan inay khilaafka ku xaliyaan rabshad la'aan, oo aysan hub adeegsan, isla mar ahaantaasna, ka shaqeeyaan sidii dhismaha dugsigu u noqon lahaa meel nabadgelyo ah. Waxaad isku deydaa inaad boqolkiiba boqol ka soo qeyb-geshid ololahaas nabadgelyada.

OO KOOBAN

- Dugsiga hub ha u soo qaadanin
- Dembi kasta si dakhso ah warbixin uga soo gudbi
- Warbixin ka gudbi wixii akhlaaq xumo ah
- Baro siyaabaha cadhada loo dejiyo
- Ka caawi kuwa kale sida dhibaatooyinka si nabadgelyo ah loogu xaliyo
- Dhallinyarada maxkamad u samee
- Ardeyda aad isku fasalka tihiin dhibaatooyinka ka caawi
- Tusaale wanaagsan u noqo ardeyda da'da yar
- Kooxda dembiyada dugsiga ilaalisa samee
- Dhammaan dugsiyada ka samee ololaha lagaga hortegayo rabsahdaha
- Ardeyda cusub dugsiga ku soo dhawee
- Saxiix "ballan qaadista nabada " lagu xalineyo khilaafka rabshad la'aan
- Iskuday inaad boqolkiiba boqol ka qeybgeshid ololaha nabadgelyada

Maqaalkan waxaan ka helnay, fasaxna noo siiyey inaan daabacano Golaha Ka-hortegga Dembiyada Qaranka ©
Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Golaha Ka-hortegga Dembiyada Qaranka waxaad ka heli kartaa

SOMALI VERSION:STUDENTS STOP VIOLENCE *shabakada Internetka ah: (www.ncpc.org).*

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Adeegyada Booliiska San Diego waxaad ka heli kartaa
Shabakada Internetka ah: (http:// prod031.sandi.net/policeservices/).

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundatio

Warbixinada kala xidhiidh: Waaxda Adeegyada Booliiska: (619) 725-7000 Maamulka (619) 291-7678 Diritaanka Su'aalaha warbaahinta : (619) 725-5578

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."